

Wargeyska Provider Hub | Agoosto 2025

Fariintan waxaa loo soo diray dhammaan dadka iska diiwaangeliyey wargeyska Provider Hub-ka. Haddii qof kuu soo gudbiyey iimaylkan, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa [inaad si toos ah isu qorto](#).

Ku soo dhawoow Wargeyska Provider Hub, oo ay daabacdo kooxda [Provider Hub](#) ee Gobolka Minnesota! Aad baan ugu faraxsanahay inaad nala socoto.

Qaybtan ugu horreysa ee wargeyska waxaad ka heli doonta:

- [Isdiiwaangeli Kalfadhiga Warbixinta Koowaad ee Provider Hub ee bisha Sebtembar](#)
- [Iimayl Cusub oo loogu talagalay Kooxda Provider Hub](#)
- [Diiwaangelinta CCAP oo laga heli karo Provider Huka bishan Agoosto ee loogu talagalay Kuwa Haysta Shatiga Daryeelka Carruurta ee Qoysaska Minnesota](#)
- [Warbixin ku saabsan Bilawga Shatiga Daryeelka Carruurta ee Qoysaska ee Provider Hub](#)
- [Xiriirka Supplier ID oo Hadda Loo Heli Karo Bixinta Lacagaha Great Start Compensation si Degdeg ah oo Ammaan ah](#)
- [Talooyin ka socda Kooxda Product Success](#)
- [Soo-saaridii Ugu Dambaysay](#)
- [Ilooyin Cusub iyo Kuwa la Cusboonaysiiyey](#)

Isdiiwaangeli Kalfadhiga Warbixinta Koowaad ee Provider Hub ee bisha Sebtembar

Kooxda Provider Hub waxay ku faraxsan tahay inay martigeliso kalfadhigeennii ugu horreeyey ee ah mid xog-wareysi guud ee maalinta Talaadada, Sebtembar 9, saacadda 6da ilaa 7da fiidnimo.

Qof kasta oo xiisaynaya inuu wax badan ka ogaado Provider Hub waa la soo dhawaynayaa. Mawduucyada laga hadli karo waxaa ka mid noqon kara astaamo cusub, horumarin dhowaan la sameeyey, ilooyin iyo dhacdooyin soo socda. Ka qaybgalayaasha waxaa loo oggolaan doonaa inay su'aalo soo gudbiyaan inta lagu jiro kalfadhiga.

[Fadlan hore isu diiwaangeli](#). Haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah (tusaale ahaan, turjubaan), fadlan isdiiwaangeli laba toddobaad ka hor dhacdata.

[Kor ugu nogo](#)

Iimayl Cusub oo loogu talagalay Kooxda Provider Hub

Kooxda Provider Hub waxay leeyihiin iimayl cusub: providerhub@state.mn.us.*

Waxaad iimaylkan u adeegsan kartaa inaad hesho jawaab-celin ku saabsan aaladda onlaynka ah ama aad u gudbiso codsiyo kooxda Provider Hub — tusaale ahaan, codsiyada ku saabsan ka qaybgalka ama fududeynta dhacdo.

Kooxda maamusha cinwaankan iimaylka ma bixiso taageero farsamo mana ka jawaabto su'aalaha ku saabsan siyaasadaha. Haddii aysan ka jawaabi karin su'aashaada, waxay ku dadaali doonaan inay kugu xiraan koox kale oo ku caawin karta.

****Fariimaha loo diray cinwaankii hore ee iimaylka kooxda Provider Hub waxaa loo gudbinayaa sanduuqan cusub.***


[Kor ugu nogo](#)

Diiwaangelinta CCAP oo laga heli karo Provider Hub bisha Agoosto ee loogu talagalay Kuwa Haysta Shatiga Daryeelka Carruurta ee Qoysaska Minnesota

Bishan, dadka haysta shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska Minnesota ee leh diiwaangelin [Child Care Assistance Program \(CCAP\)](#) oo **shaqaynaysa** ama **sugaysa** oggolaansho, waxaa loo samaynayaa akoonno Provider Hub ah.

Qaybiyaha adeegga waxa uu ka heli doonaa iimayl ka imaanaya cinwaanka

Noreply_PRD@identity.mn.gov oo lagu soo diro ciwaanka iimaylka ee ku xiran shatiga:



Dadka haysta shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska Minnesota ee hela iimaylkan waa inay mudo **todoba maalmood gudahood** xushaan batoonka **Activate Your Account** laga bilaabo taariikhda iimaylka la soo diray. Haddii aan akoonkaaga la hawlgelin waqtigaas, waa inaad codsataa dib u dejinta erayga sirta ah (password reset) — sida lagu sharaxay maqaalka [Reactivate Login if Email Link Expires](#).

Waxa ay ku samayn karaan kuwa haysta shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska ee Provider Hub (CCAP feature)

Marka qof haysta shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska Minnesota uu hawlgeliyo akoonkiisa Provider Hub, wuxuu awoodi doonaa inuu:

- Soo gudbiyo xogta CCAP, oo ay ku jiraan isbeddel iyo cusboonaysiin
- Codsado gelitaanka MEC² PRO (marka diiwaangelintooda Provider Hub la oggolaado)
- Arko ogeysiisyada uu soo diro Barnaamijka Child Care Assistance Program

Maareynta diiwaangelinta CCAP — iyo codsashada ruqsadda xarunta xannaanada carruurta — waa tallaabooyinka kaliya ee bixiyeyaasha xannaanada qoyska ee Minnesota ay ku samayn karaan Provider Hub. Bixiyeyaasha xannaanada carruurta qoyska weli ma awoodaan inay ku maamulaan Provider Hub ruqsaddooda xannaanada qoyska ama macluumaadka ku saabsan Great Start Compensation Support Payment Program.

Faa'iidooyinka muhiimka ah ee Provider Hub u leeyahay CCAP

- **Ogeysiisyo dijitaal ah** – Hel oo arag ogeysiisyada CCAP ee ku jira Provider Hub
- **Hawl-socod degdeg ah** – Gudbinta diiwaangelinta isla markiiba (real-time)
- **Ammaan ah** – Gelitaan la xaqiijiyey oo leh eray-sir (password) ilaalin ah
- **Raaxo leh** – Ku maamul macluumaadkaaga daryeelka carruurta ee Minnesota hal meel

Shuruudaha iyo su'aalaha

Faahfaahinta shuruudaha ku saabsan maamulka macluumaadka diiwaangelinta CCAP ee Provider Hub, fadlan eeg bogga kooxda taageerada [Provider Support team engagement site](#). Haddii aad qabto su'aalo, la xiriir kooxda taageerada CCAP Provider Support ccap.providers.dcyf@state.mn.us ama 651-431-4848.

[Kor ugu nogo](#)

Warbixin ku saabsan Bilawga Shatiga Daryeelka Carruurta ee Qoysaska gudaha Provider Hub

Horumar ayaa weli ka socda dhismaha nidaamka shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska gudaha Provider Hub. Sida aan ku wadaagnay isgaarsiintii aan la samaynay dadka haysta shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska, shaqaalaha shatiga ee degmooyinka, iyo la-hawlgalayaasha bishii Luulyo, waxaan dib u habaynaynaa waqtiga bilawga shaqeynta cusub si loo hubiyo hirgelin guul leh (waxaan horay ugu sheegnay in si ku-meelgaar ah loo qorsheeyey xagaaga 2025). Hadda waxaan ku jirnaa go'aan ka gaarista taariikhda bilawga.

Waa tan xogta aan hayno: Markii ugu horreysay waxaan ku tijaabin doonaa shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska gudaha Provider Hub degmooyinkan: **Becker, Cass, Crow Wing, Douglas, Hubbard, Morrison, Stevens, Todd iyo Wadena**. Kadib tijaabada, Provider Hub waxa uu si toos ah uga hawlgeli doonaa [gobol-gobol](#). Faahfaahin dheeraad ah, fadlan eeg [iimaylkii July 8 loo diray dadka haysta shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska](#).

Waxaan si firfircoon u dejinaynaa nidaamka kala horraynta gobollada iyo jadwalka bilawga, iyo sidoo kale qorsheynta dhacdooyin taageero fool-ka-fool ah. Waxaan sii wadaagi doonaa macluumaad dheeraad ah marka faahfaahinta la dhammeeyo.

[Kor ugu noqo](#)

Xiriirka Supplier ID oo Hadda Loo Heli Karo Bixinta Lacagaha Great Start Compensation si Degdeg ah oo Ammaan ah

Xarumaha daryeelka carruurta ee leh shati iyo shahaado hadda waxay ku xiriirin karaan Supplier ID shatiga ganacsigooda gudaha astaanta Great Start Compensation Support Payment Program ee Provider Hub. Tallaabadan waxa ay u oggolaanaysaa barnaamijyada inay dejiyaan direct deposit lacagaha Great Start Compensation, taas oo badbaadinaysa waqti iyo dadaal iyadoo sidoo kale kordhinaysa ammaanka.

Laga bilaabo tab-ka Payments ee bogga Great Start Compensation gudaha Provider Hub, xarumaha daryeelka carruurta waxay isdiiwaangelin karaan Supplier ID (haddii aanay hore u haysan) ama ku xiriirin karaan Supplier ID ay hore u hayaan codsiyada mustaqbalka.

Applications Payments Funds Reporting

Link Your Supplier ID

A Supplier ID number is for businesses receiving payments from the State and makes sure your payments and tax documents are processed smoothly. It also provides the option for you to receive your payments more quickly and securely through direct deposit into a bank account.

- If you do not have a Supplier ID, start at Step 1.
- If you already have a Supplier ID, start at Step 2.

Step 1: Register for your Supplier ID

You will need your Tax Identification Number (TIN), such as an Employer Identification Number (EIN) or Social Security Number (SSN). For Direct Deposit, you will need your bank account and routing numbers.

[Click here to begin](#)

Step 2: Link your Supplier ID

Link your Supplier ID to your future Great Start Compensation payment applications

[Link your Supplier ID](#)

[Need Help? Submit a Case.](#)

Ka eeg Great Start Compensation [Maktabadda Waxbarashada Supplier ID](#) tilmaamaha ku saabsan sida loo adeegsado astaantan cusub ee Provider Hub.

Haddii aad qabto su'aalo, [gudbi codsi \(case\) kooxda Great Start Compensation Support team](#) marka aad ku jirto Provider Hub (*xarumaha daryeelka carruurta ee leh shati iyo shahaado oo keliya*) ama wac 651-273-2644 (*dhammaan bixiyeyaasha*).

Supplier ID waa nambar gaar ah oo ganacsi hela marka uu isu diiwaangeliyo inuu noqdo alaab-qeybiye (supplier) dawladda Minnesota. Haddii aad hadda ku qaadato lacagaha Great Start Compensation direct deposit, tallaabo kale looma baahna.

[Kor ugu nogo](#)

Talooyin ka socda Kooxda Product Success

Kooxda Product Success, oo hore loogu yaqaanay Product Experience team, waa koox khubaro maxalli ah oo ku caawinaya sidii aad ugu guulaysan lahayd isticmaalka Provider Hub.

La xiriir kooxda

Wac 651-431-6075 ama u gudbi codsi taageero ah [submit a support case \(PDF\)](#) marka aad ku jirto Provider Hub.

Haddii qof aanu diyaar ahayn markaad wacdo, fadlan fariin u reeb. Fariintaada ku dar inta macluumaad ee suuragal ah ee hoos ku qoran:

- Magacaaga
- Magaca barnaamijkaaga
- Nambarkaaga telefoonka
- Su'aasha(ha)ada iyo/ama codsiga(ga)aga
- Nambarka shatiga ganacsiga (haddii la heli karo/khuseeyo)

Ma helno wax macluumaad ah dadka soo waca ee aan fariin ka tagin. Sidaas darteed, xog kasta oo aad ku reebto fariinta waxay naga caawisaa inaan si hufan oo degdeg ah dib kuu soo wacno.

Waxaan ka jawaabnaa codsiyada Isniin ilaa Jimce inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo. Haddii aad fariin ka tagto ama aad codsi taageero onlayn ku gudbiso, waxaan ku dadaalaynaa inaan ka jawaabno 24 saacadood gudahood — inkasta oo ay taasi ku xirnaan karto tirada codsiyada aan helayno.

Saddex ka mid ah Su'aalaha Ugu Sarreeya — iyo Ilo kaa caawinaya

- **Sideen ku galaa oo/ama ku beddelaa erayga sirta ah (password)?** Ka eeg [Gelitaanka iyo Beddelidda Furaha Sirta \(Log In and Change Your Password\) \(PDF\)](#).
- **Waxaan maamulaa/ka shaqeeyaa xarun daryeel carruur oo leh shati. Sideen ku dari karaa, cusboonaysiin karaa ama uga saari karaa qolalka uu barnaamijkaygu isticmaalo?** Ka eeg [Request a Change to Your Program Location or Room Usage in the Provider Hub](#).
- **Waxaan maamulaa/ka shaqeeyaa xarun daryeel carruur oo leh shati. Sideen ugu qori karaa kala-duwanaanshaha shaqaalaha (personnel variance) gudaha Provider Hub?** Ka eeg [Add or Update Personnel & Request Personnel Related Variances](#) iyo [Submit a Personnel Variance](#).

[Kor ugu nogo](#)

Soo-saaridii Ugu Dambaysay

Waxaan sameynay horumar ku saabsan Provider Hub Luulyo 24. Cusboonaysiinta waxaa ka mid ahaa:

- Waxaa lagu daray awoodda bixiyeyaasha leh diiwaangelin CCAP (Child Care Assistance Program) oo la oggolaaday gudaha Provider Hub inay codsadaan isticmaaleyaal cusub oo [MEC² PRO](#) uah
- Cusboonaysiino dhowr ah oo lagu sameeyey codsiga lacag-bixinta Great Start Compensation ee ay isticmaalaan xarumaha daryeelka carruurta ee leh shati iyo shahaado, si loo wanaajiyo waayo-aragnimada codsiga
- Hagaajinta nidaamka fayl gelinta guud ahaan Provider Hub, oo ay ku jirto awoodda [lagu geliyo noocyo badan oo faylal ah](#) iyo digniin qoraal dheeraad ah [haddii fayl\(asha\) ay aad u weyn yihiin si loo geliyo](#)

Ka eeg [July Provider Hub Release Notes](#) faahfaahinta ku saabsan cusboonaysiintan iyo kuwo kale.

[Kor ugu noqo](#)

Ilooyin Cusub iyo Kuwa la Cusboonaysiiyey

Ilooyin dhowr ah oo Provider Hub ah ayaa hadda lagu ururiyey hal meel — waxaannu ugu yeernay learning libraries. Maktabadahan waxaa loo habeeyey mowduucyo si ay kuugu fududaato inaad hesho ilaha aad u baahan tahay.

Waa kuwan uruurinta maanta diyaar ah:

- [Licensed Child Care Centers: Licensing](#)
- [Certified Child Care Centers: Certification](#)
- [Great Start Compensation: Maktabadda Waxbarashada \(Application\)](#)
- [Great Start Compensation: Maktabadda Waxbarashada \(Use of Funds Report\)](#)
- [Great Start Compensation: Maktabadda Waxbarashada \(Supplier ID\)](#)
- [Technology Resources](#) — ku habboon dadka cusub iyo kuwa mustaqbalka ah ee isticmaalaya Provider Hub kuwaas oo u baahan taageero si ay ugu raaxaystaan isticmaalka tiknoolajiyada

Waxaad daawan kartaa maktabadahan adoon galin Provider Hub. Waxaad ka heli kartaa bogga [Provider Hub](#) qaybta **Resources**. Waxa kale oo lagu baari karaa gudaha [Provider Hub](#), qaybta caawimaadyada iyo ilooyinka **Help & Resources**.

[Kor ugu nogo](#)

Ku Saabsan Provider Hub

Provider Hub waa aalad onlayn ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha adeegyada bulshada si ay ugu codsadaan oo ay ugu maamulaan shatiyada, maalgelinta iyo barnaamijyada kale ee dawladda.

Waxaan sii wadeynaa horumarinta aaladda onlaynka ah iyo dhisidda astaamo cusub. Markaan taas sameyno, bixiyeyaasha badan ayaa heli doona gelitaanka. Ka eeg bogga [Provider Hub](#) faahfaahinta helitaanka hadda.

[Kor ugu nogo](#)

Ku Saabsan Wargeyska Provider Hub

Wargeyskani waxa uu la wadaagaa macluumaad guud oo ku saabsan Provider Hub dadka hadda isticmaala iyo kuwa mustaqbalka isticmaali doona aaladda onlaynka ah, iyo sidoo kale cid kasta oo danaynaysa. Waxaan soo dirnaa wargeys cusub oo Provider Hub ah qiyaastii labadii biloodba mar. Ka hel qaybihii hore bogga [Provider Hub](#).

Ma nihin inaan wargeyskan ku beddelno macluumaadka si toos ah loogu diro kooxo gaar ah — sida digniinaha loogu diro dadka hadda isticmaala Provider Hub ama xogta lagu soo dhaweeyo dadka mustaqbalka isticmaali doona. Kuwan waan sii diraynaa gooni.

Hel wargeyskan afafka español, Af Soomaali iyo Lus Hmoob

Kooxda Provider Hub waxay daabacdaa wargeys kasta afar luqadood: Ingiriisi, español (Isbaanish), Af Soomaali (Somali) iyo Lus Hmoob (Hmong).

Nooca Ingiriisiga ah ayaan marka hore ku soo dirnaa iimayl. Marka noocyada kale diyaar noqdaan, waxaan ku dhejinaynaa bogga [Provider Hub](#). Marka noocyada español, Af Soomaali iyo Lus Hmoob ay

diyaar noqdaan, dhammaan waxaannu si wadajir ah ugu soo dirnaa iimayl dadka isdiwaangeliyey wargeyska.

Lawadaag wargeyskan dadka kale

Ma taqaan cid kale oo laga yaabo inay xiisaynayso helitaanka wararka ku saabsan Provider Hub? U sii iimaylkan oo ku dhiirigeli [inay si toos ah isugu qoraan wargeyska](#).

[Kor ugu nogo](#)